جمهورية مصر العربية ٢٩ذو الحجة ١٤٤٠هـ
وزارة الأوقاف ٣٠ أغسطس ٢٠١٩م

# مفهوم الهجرة بين الماضي والحاضر

## Aragtida hijrada waagii hore iyo hadda

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

{إِلَّا تَنْصُرُوهُ فَقَدْ نَصَرَهُ اللَّهُ إِذْ أَخْرَجَهُ الَّذِينَ كَفَرُوا ثَانِيَ اثْنَيْنِ إِذْ هُمَا فِي الْغَارِ إِذْ يَقُولُ لِصَاحِبِهِ لَا تَحْزَنْ إِنَّ اللَّهَ مَعَنَا فَأَنْزَلَ اللَّهُ سَكِينَتَهُ عَلَيْهِ وَأَيَّدَهُ بِجُنُودٍ لَمْ تَرَوْهَا وَجَعَلَ كَلِمَةَ الَّذِينَ كَفَرُوا السُّفْلَى وَكَلِمَةُ اللَّهِ هِيَ الْعُلْيَا وَاللَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٌ}

**(haddaydaan u gargaarin Nabiga waxaa u gargaaray Alle markay soo saareen kuwii gaaloobay isagoo labo midkooda markay godka ku jireen markuu ku lahaa saaxiibkiis ha walbahaarin Alle ayaa inala jiree, oo Alle wuxuu ku dajiyay xasilkiisa kuna xoojiyay ciidan aydaan arkayn kana yeelay kalimadda kuwa gaaloobay tan hoosaysa, kalimadda Ilaahayna waa tan sarreysa, Allana waa adkaade falsan)**

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa sayidkeena iyo nabigeena inuu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa

iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Intaas kaddib:**

Markuu soo darsaday dhibka lagu hayay asxaabta nabiga ku sugnaa Makka, ayaa nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - u fasaxay sannadka shanaad ee soo saaridda inay u hijroodaan Xabasha asgoo ku leh:

**(إِنَّ بِأَرْضِ الْحَبَشَةِ مَلِكًا لَا يُظْلَمُ عِنْدَهُ أَحَدٌ ، فَالْحَقُوا بِبِلَادِهِ ، حَتَّى يَجْعَلَ اللهُ لَكُمْ فَرَجًا وَمَخْرَجًا مِمَّا أَنْتُمْ فِيهِ)**

(**Dhulka xabashada waxaa jooga boqor aan agtiisa qof lagu dulminayn, ee dalkiisa haleela, ilaa Ilaahay faraj idinkaga yeelayo waxa aad ku jirtaan**), Asxaabta qaarkooda ayaa aaday, xabasha ayay ku degeen waxyna ku negaadeen meel fiican iyo deris wanaagsan, diintooda ayaa u nabadgashay rabbigooda ayay caabudeen, ilaa ay ka maqleen reer Makka inay islaamka soo wada galeen, waxay go'aansadeen inay mar labaad soo noqdaan, Arrintii markay noqotay been dhibna uu qabsaday, wuxuu u fasaxay nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - mar labaad inay u

hijroodaan Xabasha, waxaana hoggaaminayay Jacfar bin Abii Daalib -Ilaahay raalli haka noqdee -.

Markay Qureysh ogaatay meel amaan ah inay joogaan ee boqor caadil ah agtiisa, waxay isku dayeen in lasoo celiyo mar kale, waxay usoo direen ergey boqorka Najaashi iyagoo ka dalbanaya inuu soo dhiibo dadkaas, wuxuu yiri: maya wallaahi dad dalkayga magangalyo usoo galay qof uma dhiibayo, oo ka doortay derisnimadayda dadka kale ilaa aan ugu yeero oo aan ka maqlo, kadddib jacfar bib Abii Daalib ayaa istaagay, siduu u raddiyo waxay Qureysh sheegeyso iyo been-abuurkeeda, wuxuu yiri: Boqorow waxaan ahayn dad sanamyada caabudo, bakhtigana cuno xaaraamtana xalaalaysta, xumaan ayaan sameyn jirnay qaraabada ayaan goyn jirnay deriska ayaan xumeyn jirnay, midkeena xoogga leh kan tabarta yar ayuu cuni jiray, sidaas ayaan ku sugneyn, Ilaa Alle noogu soo saaro rasuul naga mid ah aan nasabkiisa garanayno, iyo runtiisa iyo amaanadiisa iyo dhowrsanaantiisa wuxuu noogu yeeray Ilaahay inaan mideyno oo aan caabudno, inaan ka tagno wixii aan caabudi jirnay annaga iyo aabbayaasheena oo dhagxaanta Alle sokoadiisa iyo sanamyada, wuxuu na faray hadalka runta iyo gudashada amaanada iyo xiriirinta qaraabada, iyo derisga inaan wanaajino, xaaraamtana aan ka tagno iyo

dhiigga, wuxuu naga reebay xumaanta iyo hadalka beenta iyo cunidda hantida agoonta iyo haweeneyda dhowrsan in la qadfiyo (lagu been abuurto), wuxuu na amray inaan caabudno Alle kaligiisa oo aanan wax la wadaajinin, wuxuu na amray salaadda iyo sakada iyo soonka, Sayidnaa Jacfar wuxuu u tiriyay arrimaha Islaamka kaddib wuxuu yiri: waan rummeynay waxaan ku raacnay wuxuu noola yimid, Ilaahay kaligiisa ayaan caabudnay waxna lama wadaajinin, wuxuu naga xarrimayna waan xarrimnay wuxuu noo xalaaleeyayna waan xalaalaynay, marka dadkeena ayaa nagu xadgudbay way na cadaabeen diinteena ayay naga fidneeyeen si ay noogu celiyaan cibaadada sanamyada oo ay nagaga leexiyaan cibaadada Alle, iyo inaan xalaalaysano wixii xumaa aan xalaalaysan jirnay Markay na dhibeen ooy na dulmiyeen oo na rafaadiyeen oo ay diinteena naga reebeen dalkaaga ayaan soo aadnay, waxaan kaa dooranay dadka kale, waxaan jecleysanay derisnimadaada waxaan rajeynay boqorow inaanan agtaada laynagu dilminin, Najaashi wuxuu ku yiri: ma haysaa wax ka mid ah wixii xagga Ilaahay uu idin kala yimid? Wuxuu yiri Jacfar: haa, Wuxuu ku yiri Najaashi igu akhri: wuxuu ku akhriyay qeybta hore ee suuratu Maryam, wuu ooyay Najaashi ilaa garkiisa ka qooyo baadiriyaashiisana way ooyeen markay maqleen wixii uu ku akhriyay Jacfar, kaddib wuxuu yiri Najaashi: hadalkan

wallaahi wuxuu kasoo baxayaa meeshuu kasoo baxay wixii Nabi Ciise la yimid ee baxa cid idinma dhiibayo waligeyga.

Qofka si fiican u fiirfiiriyo labada hijro ee Xabasha wuxuu si fiican u ogaanayaa hijrada muslimiinta hore inaysan ahayn in laga hijroodo dal gaal oo loo hijroodo dal muslin, maxaayeelay asalka waa in la difaaco dalka oo aan loo dhaafin daalimka ama xadgudbaha, waxay ahayd hijradooda in laga hijroodo dal cabsi leh oo loo hijroodo dal amaan ah, maxaayeelay Najaashi boqorka Xabasha markaas ma haysanin diinta islaamka, laakin wuxuu ahaa xaakim garsoore ah oo ay dadka agtiisa nabad kaga helayaan diintooda iyo naftooda iyo hantidooda, Sidaas awgeed waxaa la yiri: (Ilaahay wuxuu u gargaaraa dowladda cadaaladda ku dhaqanto xataa hadday gaal tahay, wuxuu hoojiyaa dowladda dulmiga sameyso xataa hadday muslin tahay), mulkiga waa laga yaabaa inuu la daa'imo gaalnimada laakin lama daa'imayo dulmiga, dowladda dulmiga ku dhisan ma sii jireyso xataa hadduu yahay qofka madax ka ah muslin, nabigeena - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - wuxuu geeyay xaakimka caadilka ah meel sare, maalinta qiyaame wuxuu ugu horreeyaa toddobada Alle ugu hareynayo harka carshigiisa maalinta aan har jirin harkiisa mooyee, illeen cadaaladdiisa ayaa bulshada ku hagaagayso dulmigiisana way ku fasahaaddaa.

Markuu Alle u fasaxay nabigiisa- naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - inuu u hijroodo Madiina Almunawara wuxuu soo baxay nabiga asoo guusha Alle la socoto, maxaayeelay hijrada waxay ahayd isbaddal fiican xagga dhisidda dowladda, iyo xaqiijinta iskula noolaanshaha nabadeed iyo walaaltinnimada, iyo mideynta umadda si ay ugu suurtowdo gaarsiinta risaalada Alle caalamka ku wajahan, Alle wuxuu ka leeyahay arrintaas:

**{إِلَّا تَنْصُرُوهُ فَقَدْ نَصَرَهُ اللَّهُ إِذْ أَخْرَجَهُ الَّذِينَ كَفَرُوا ثَانِيَ اثْنَيْنِ إِذْ هُمَا فِي الْغَارِ إِذْ يَقُولُ لِصَاحِبِهِ لَا تَحْزَنْ إِنَّ اللَّهَ مَعَنَا فَأَنْزَلَ اللَّهُ سَكِينَتَهُ عَلَيْهِ وَأَيَّدَهُ بِجُنُودٍ لَمْ تَرَوْهَا وَجَعَلَ كَلِمَةَ الَّذِينَ كَفَرُوا السُّفْلَى وَكَلِمَةُ اللَّهِ هِيَ الْعُلْيَا وَاللَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٌ}**

**(haddaydaan u gargaarin Nabiga waxaa u gargaaray Alle markay soo saareen kuwii gaaloobay isagoo labo midkooda markay godka ku jireen markuu ku lahaa saaxiibkiis ha walbahaarin Alle ayaa inala jiree, oo Alle wuxuu ku dajiyay xasilkiisa kuna xoojiyay Junuud aydaan arkayn kana yeelay kalimadda kuwa gaaloobay tan hoosaysa, kalimadda Ilaahayna waa tan sarreysa, Allana waa adkaade falsan)**

Sannadka siddeedaad hijriyada Ilaahay wuxuu u furay nabigiisa - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - Makka Almukarrama furasho cad, dadkana diinta Alle

waxay soo galeen iyagoo kooxo ah, waxayna isu rogtay aragtida hijirada macne ka ballaaran macnaheeda hore oo dhinacyada nolosha oo dhan ay soo wada galayaan, Furashada Makka wixii ka dambeeyay way dhammaatay hijrada lagasoo hijroonayo meel oo loo hijroonayo meel kale, markay ahayd soo guuridda wax layska rabo waqtiga tabaryarida, wuxuu leeyahay Alle:

**{إِنَّ الَّذِينَ تَوَفَّاهُمُ الْمَلَائِكَةُ ظَالِمِي أَنْفُسِهِمْ قَالُوا فِيمَ كُنْتُمْ قَالُوا كُنَّا مُسْتَضْعَفِينَ فِي الْأَرْضِ قَالُوا أَلَمْ تَكُنْ أَرْضُ اللَّهِ وَاسِعَةً فَتُهَاجِرُوا فِيهَا فَأُولَئِكَ مَأْوَاهُمْ جَهَنَّمُ وَسَاءَتْ مَصِيرًا}**

(**Kuwa ay oofsato malaa'igtu iyagoo dulmiyay naftooda waxay ku dhahaan maxaad ahaydeen waxayna dhahaan kuwo lagu daciifsaday dhulka, waxayna dhahaan (malaa'igtii) miyuuna ahayn dhulka Ilaahay wasaac ood ku hijrootaan dhexdiisa, kuwaas hooygoodu waa Jahannamo wayna u xun tahay aaye**), xukunka hijrada farashada Makka kaddib wuu isbaddalay wuxuu leeyahay nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

**(لَا هِجْرَةَ بَعْدَ الْفَتْحِ وَلَكِنْ جِهَادٌ وَنِيَّةٌ) .**

(**Hijro ma jirto furashada Makka kaddib laakin jihaad ayaa jiro iyo niyo**).

Markuu soo islaamay Safwaan bin Ummaya -Ilaahay raalli haka noqdee - waxaa lagu yiri asoo jooga Makka: diin ma laha qofkaan hijroonin, wuxuu yiri: gurigayga ma aadayo ilaa aan Madiino ka tago, Madiina ayuu tagay wuxuu ku degay sayidnaa Cabbaas bin Cabdilamudalib - Ilaahay raalli haka noqdee - kaddib nabiga ayuu u yimid wuxuu ku yiri: (**maxaa ku keenay Abaa wahabow?**) wuxuu yiri: waxaa la yiri: diin ma laha qofkaan hijroonin, wuxuu yiri nabiga: (**u laabo Abaa wahabow dhulka Makka diintiina ku sugnaada hijrada way dhammaatay, laakin jihaad iyo niyo ayaa jira**), Wuxuu leeyahay nabigeena - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

**(المُسْلِمُ مَنْ سَلِمَ المُسْلِمُونَ مِنْ لِسَانِهِ وَيَدِهِ، وَالمُهَاجِرُ مَنْ هَجَرَ مَا نَهَى اللَّهُ عَنْهُ)**

(**Muslinka waa midka ay ka nabadgaleen muslimiinta carrabkiisa iyo gacantiisa, muhaajirkana waa kan ka hijrooday wixii Ilaahay ka reebay**).

Haddii amarka hijrada Makka xagga Madiina uu dhammaaday marka Makka la furtay macnaha hijrada qiimaha badan wali wuu jiraa, waxaana laynaga rabaa inaan ku dadaalno, wuxuu sugay nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - in hijrada dhabta ay tahay in nolosha laga dhigo mid ka fiican tii hore, tusaale ahaan in lagasoo tago wahsiga iyo baagamuundada oo

lasoo aado shaqo iyo dadaal iyo sugid, iyo in laga soo tago nafjeclaysiga iyo qabyaaladda jaahiliyada ah oo lasoo aado walaaltinnimo oo dhab ah iyo wax huridda, iyo in la oggolaado kaladuwanaanshaha iyo aadanaha inuu xaq u leeyahay doorashada oo aan qasab jirin, iyo xiriirka deriswanaagga, in lagu dadaalo dhisidda aadanaha xagga iimaanka iyo aqoonta iyo fikirka iyo dhaqanka iyo akhlaaqda iyo dhaqaalaha iyo bulshada dhisid toosan oo sugan kaasoo dowlad dhisaya iyo xadaaro, oo dadka wax u taraya, ilaalinaya qiimaha dadka.

Fahanka saxa ah ee macnaha hijrada dhabta ah wuxuu keenayaa hijrada inaysan dhamaanaynin, waqti kaste waa in laga soo wareego jahliga oo cilmiga lasoo aado, baadinimadana in laga soo tago oo hanuunka lasoo aado, dhaqanka xunna in lagasoo tago oo akhlaaqda fiican lasoo aado, fasahaadka in lagasoo wareegto oo hagaajinta lasoo aado, si kaalin ka geysanaysa dhismaha xadaaradda iyo camiridda koonka, maxaayeelay diinteena waa diinta dhismaha iyo camiridda koonka oo dhan, wuxuu yiri Alle:

**{هُوَ أَنْشَأَكُمْ مِنَ الْأَرْضِ وَاسْتَعْمَرَكُمْ فِيهَا}**

(**Isagaana idiinka ahaysiiyay dhulka idinkuna camiray dhexdiisa**)

Ummaddeena waa ummadda shaqada ee ma aha ummadda wahsiga, waa ummadda dhismaha ee ma aha ummadda dumiska iyo burburinta, waa ummadda xadaaradda, dhibiudhaca waligiisa muusan ka mid ahayn sifooyinkeeda, Waxaa ku habboon qof kaste muslin oo diintiisa jecel oo sharaf ka raadinaya inuu ka shaqeeyo siduu diintiisa kor ugu qaadi lahaa, iyo siduu waddankiisa u sharfi lahaa asoo ka fog dhammaan khaladaadka iyo xadgudubka iyo xagjirnimada, sida inuu u hijroodo oo kale kooxaha diinta khilaafsan oo muslinka argagixinaya asoo loo sheegayo jihaad aan jirin oo dan kale laga leeyahay, ama qofka inuu hijro aan sharciyaysaneyn galo oo halaag u keenayso ama dulli, waa midda qaanuun ahaan la reebay sharci ahaanna dembi ah, maxaayeelay dalalka xurmada guryaha oo kale ayay leeyihiin, sideysan u bannaanayn qof gurigiisa idin la'aantiisa in la galo sidaas oo kale lama oggola in la galo dowlad dhulkeeda iyadoon loo soo marin waddada jideysan, sidoo kale qofka siduusan u rabin qof inuu kusoo dhuunto dalkiisa ama uu kusoo galo jidad qaldan sidoo kale waxaa ku haboon inuusan isagana oggolaanin dowlad kale in lagu sameeyo arrinkaas.

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa sayidkeena iyo nabigeena Muxamed inuu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

**Walaalaha islaamka ahow:**

Munaasabaddan qiimaha badan nama dhaafayso inaan ku sheegno in bisha Muaxarram ay ka mid tahay bilaha xurmadda leh, waxaa fiican in soonka la badsado guud ahaan, wuxuu yiri rasuulka:

**(أَفْضَلُ الصَّلاَةِ بَعْدَ الصَّلاَةِ الْمَكْتُوبَةِ الصَّلاَةُ فِي جَوْفِ اللَّيْلِ ، وَأَفْضَلُ الصِّيَامِ بَعْدَ شَهْرِ رَمَضَانَ صِيَامُ شَهْرِ اللَّهِ الْمُحَرَّمِ)**

(**Salaadda ugu fadli badan salaadda faradka kaddib waa salaadda habeenka gudihiisa, soonkana waxaa ugu fadli badan Ramadaan kaddib in la soomo bisha Alle ee Muaxarram**), gaar ahaan soonka maalinta tobonaad, wuxuu yiri rasuulka:

(صِيَامُ يَوْمِ عَاشُورَاءَ، أَحْتَسِبُ عَلَى اللّهِ أَنْ يُكَفِّرَ السَّنَةَ الَّتِي قَبْلَهُ)

(**Soonka maalinta tobonaad waxaan rajeynayaa in Ilaahay ku dhaafayo sannadka ka horreeyay**)

Markuu nabiga yimid Madiina wuxuu arkay yahuudda oo sooman maalinta tobonaad wuxuu yiri: (**waa maxay kan?**) waxay dhaheen: waa maalin wanaagsan waa maalinta Ilaahay ka badbaadiyay banii israa'iil cadowgooda, nabi Muusena wuu soomay, wuxuu yiri: (**anaa idinkaga xaqnimo badan Muuse**), wuu soomay wuxuuna amray in la soomo, wuxuu yiri Ibnu cabbaas - Ilaahay raalli haka noqdee -: markuu soomay rasuulka maalinta tobonaad oo uu amray in la soomo waxay dhaheen rasuulkii Allow waa maalin ay weyneeyaan yuhuudda iyo kirishtaanka, wuxuu yiri rasuulka: (**sannadka soo socda marka la gaaro - haddii Alle idmo - waxaan soomeynaa maalinta sagaalaad**) oo macnaheeda ah sagaalka ayaan la soomeynaa tobanka, waxaa sunnada ah in la soomo tobanka muxarram, waxaa habboon in sagaalka lala soomo.

**Waxaan Alle weyddiisanaynaa inuu na waafajiyo waxa uu jecel yahay oo uu raalli ka yahay, iyo inuu ka dhigo sanadka hijriga cusub sannad khayr iyo barako leh iyo guul dhamaan dalalka muslimiinta.**